

# Wada-sameynta u doodista iyo cilmi-baarista ku saabsan autism-ka carruurta Soomaalida ee Järva

Mashruucani waa mid maalgelyo qorsheyn laga helay FORTE, waxaana qorshuhu yahay in aan adeegsano hab cilmi-baaris bulsho ku dhisan (community-based participatory research) si loo yareeyo kala-duwanaanshaha caafimaadka loona xaqiijiyo in cilmi-baarista autism-ku ku habboonaato dhammaan dadka.

Autism oo ku fidsan heerar kala duwan oo ay la socdaan naafonimo garasho waa xaaland culus oo dadka muddo dheer saameyneysa. Daraasado badan oo isdaba-joog ah ayaa muujinaya in carruurta ka soo jeeda qoysaska muhaajiriinta ay khatar sare ugu jiraan xaaladdan, balse ay ku yar tahay inta isticmaasha adeegyada caafimaad ee jira ee loogu talagalay xaaladdaan.

Ujeedada mashruucani waa:

- In la baaro sababaha kala duwan ee keena in carruurta muhaajiriinta ay khatar sare ugu jiraan autism oo la socda naafonimo garasho, lagana gudbo xogta cilmi-baarista una gudubto facil wax ka qabta si looga hortago xaaladdan.
- In si wadajir ah loo sameeyo, loo tijaabiyo barnaamijyo loogu talagalay in lagu kobciyo fahamka xaaladdan ee muhaajiriinta ee halista ugu jira, si loo yareeyo ceebta la socota xaaladdan loona kordhiyo isticmaalka adeegyada caafimaad ee la heli karo oo ku saleysan cilmi-baaris.

Si cilmi-baaristu ay u caawiso carruurta ay saameyneysa oo ay u horumari karaan, waa muhiim in lala shaqeeyo dadka ay xaaladdu si toos ah u saameyso, si aan loo dayicin waxyaabaha halista ah loona hubiyo in natiijooyinka cilmi-baarista laga faa'iideysan karo.